



CENTER FOR INCLUSIVE CHILD CARE

Talooyin Kooban

Sida Waalidiinta Loolawadaago waxa Caruurtooda Khuseeya

Kormeerka iyo Diwaangelinta



Hadii aad si joogtaa aad u kormeertid una diwaangelisid korinnimada caruurta oo dhan oo xanaanadaada lagu

hayyo, waxaa lagayaabaa in cunug walaac khaas ah aad ka qabtid xagga korinnimada uu jiro, waxaana markaa kugu imaanaya in aad walacaas aad lawadaagtid cunuga waalidiintiisa.

Walacaas oo waalidiinta lala wadaago ayaa badanaa waxay tahay wadaha ugu culus ay dadka xanaanada iyo daryeelka caruurta kashaqeeya ay lasoo gudboonaato. Ayadoo ay tahay wadaha ugu culus, ayaa talooyinka iyo xeeladaha soo socda ay yarayn karaan xiisadda una fududaynaya qofka caruurta daryeela in uu diyaarsado qaabka ugu haboon oo u kuqaabili karo wadahaadalkaan qiimaha badan.

U diyaar Garow Wadahadal

Waxaa laga yabaa tilaabada ugu muhiimsan oo lagafakaro markii walidiinta larabo in lala wadaago walaac, kadib markii aad latimaadid kormeerka saxdaa oo ujeedada kusalaysan iyo diwaangelinta cunuga korinnimadiisa, in ay tahay sida aad wadahadalka aad waalidiinta layeelanaysid aad u diyaarsan lahayd.

Kafakar wixii dhaqan duwaaanan ah oo jira, tixgelin gaar ah nah sii kaladuwanaantaas inta aadan wadahadalka uu san bilaaban.

- Kaladuwanaantaan matahay mid saamayn kuleh korinnimada cunuga.
- Su'aalaha aad u baahantahay, ee kusaabsan dhaqanka cunugga iyo baahida xagga korinnimada cunuga in aad waalidka weeydiisid maxay yihiin?
- Majiraan arimo dhaqameed ee xagga waalidka kulanka kulayeelanaya kasocota.

Tixgelintaan iyo ilaalinta shucuurta waalidka ayaa aad muhiim ugu ah in aad kuguulaysatid kulanka aad layeelanaysid waalidiinta. Tallaabada xigta waxaa weeye, diyaarso lambarada taleefannada ee macluumaadyada qiimaynta ee bulshada oo aagaaga kuyaal. In aad keliya waalidka utilmaantid meesha ay karaadsan karaan caawinaad siyaadaa, waxaa kasi fiican oo waalidiinta ufududeeynaysa in aad waalidka udiyaarisid lambar taleefoon iyo qof khaas ah magaciisa oo ay laxiriiraan.

Ugudambayn, lagana yaabee in ay tani ugu muhiimsantahay, waqti yar qaado oo isu uruuri fikradaahaga intaadan wadahadalka waalidka labilaabin oo xasilloonnaan kubilaaw. Waxa aad samaynaysid waa wax ufiicaan daryeelka cunuga taasna maskaxda gasho.

In aad Laqaybsatid Walaacaaga

Tilaabada xigta waa waalidka oo aad kulawadaagtid walaaca iyo walwalka kulan khaas ah. Siyaabo kala duwan ayuu kulankaan si fudud ugu socon karaa dadka kulmaya. Waa muhiim aad ah in ay meesha lagu kulmayo ay tahay meel dagan oo raaxo leh, asturnaan nah leh. Sidoo kale, waalidiinta ka qanci in ay waxa aad kawada hadashaan ay noqonayaan wax qarsoon oo aan la

shaacin. Tani waa muhiim aad ah maadaama waalidku uu ka kurboon karo in ilmahooda lagafaafiyo warbixintooda, iyo in ay gasho cabsi ah si dadka kale kaduwan amaa laguula dhaqmaa, ama in cunugooda xanaanada laga cayrsho.

Qancintaada ayaa cabsida ay qabaan kabaabi'inaysa inta hore ba. Inta aad waalidka lawadaagaysid warbixintaada, sidoo kale lawadaag waalidka qoraallada aad kahaysid ilmahooda, iyo tusaalooyinka aan wax far fiiq ah lahayn. Sii waalidiinta waqti badan ay su'aalo kugu weeydiyaan. Markastana xushmad iyo qadarin muuji. Wa'ay ku adagtahay walidiinta in ay maqlaan cunugoodaa wax si kayihiin; U garowso su'aalhooda iyo hadalladooda in ay katimid cabsi iyo walaac.

Ugu Horreyn

Kow, diyaarso qoraal khaas ku ah caqabadaha aad aaminsantahay in uu cunugu qabo, iyo waraaqihii kormeerka. Tani waxay kaa caawinaysaa in aad hawshaada kusocoto inta aad waalidiinta lahadlaysid. Wixii aad cunugu ku aragtay hadalkaaga kukoob, qoraal nah samayso. Kadib, waalidiinta ka codso waqti khaas ah oo aad lakulantid, waxaana fiican waqti labadiino aad si fataax ah oo aan karkabado lahayn aad u wada hadli kartaan. Tani waa in aysan noqon marka ilmaha lakeeneyo ama marka laqaadanayo caruuta, in uu waalidku uu kuu hayyo waqti siyaadaa oo uu kuugu lafariisan karo moyee aduguna aad haysatid qof kale oo kulashaqeeeya oo kuusii fiiriya caruurta inta aad waalidka kulanka kulajirtid.

Wixii macluumaad dheeraad ah, booqo
www.inclusivechildcare.org.

Copyright © 2020 Center for Inclusive Child Care

Qalabkan waxaa si tartiib tartiib ah loogu soo saari karaa ujeedooyin waxbarasho. Macluumaadka ku yaal xaashidan tilmaamaha ah waxaa laga beddelay ilo badan.

Dhaqaale ay bixiso Waaxda Adeegyada Aadanaha ee Minnesota.

www.inclusivechildcare.org